



WISCONSIN

Imtixaanka Gudbidda

Warbixinta Ardayga

Magaca Ardayga: Ardayga Magaciisa
Fasalka: Geerka fasalka
Taariikhda Dhalashada: XX/XX/XXXX
Aqoonsiga Ardayga ee Gudaha: XXXX
Dugsiga: Magaca Dugsiga
Degmada: Magaca Degmada
Taariikhda Imtixaanka: Sannadka Imtixaanka la Qaadav

Waxyaabaha ku saabsan Imtixaanka Gudbidda ee Wisconsin

Tacliinta Luuqadda Ingiriisiga, Xisaabta, Sayniska iyo Cilmiga Bulshada

Imtixaanka Gudbidda Wisconsin waxaa laga qaadaa fasalada 3-8 kaasoo ku saabsan qaybaha Tacliinta Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta, Sayniska fasalada 4aad iyo 8aad, iyo Cilmiga bulshada fasalada 4aad, 8aad, iyo 10aad. Imtixaanka Gudbidda Wisconsin wuxuu waafaqsan yahay Xeerarka Tacliinta ee Wisconsin. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Imtixaanka Gudbidda Wisconsin, fadlan booqo bogga websaytka Imtixaanka Gudbidda Wisconsin <http://dpi.wi.gov/assessment/forward>.

Ujeedada Warbixintaan

Warbixintaan waxaa kujira macluumaad ku saabsan guulaha ardayda ee Imtixaanka Gudbidda Wisconsin si waafaqsan Xeerarka Tacliinta ee Wisconsin. Waxay keenaysaa xog ka caawin karta ardayda, waalidiinta, iyo barayaasha sidii ay u ogaan lahaayeen meelaha gaarka ah ee ay ku waanaagan yihiin iyo baahiyahooda.

Heerka Shaqada Ardayga

	Aasaasiga Ka hooseeya	Aasaasi	Wanaagsan	Heer sare	Heerka Boqoleyda Gobolka
Tacliinta Luuqadda Ingiriisiga Fasalada 3-8					
Xisaabta Fasalada 3-8					
Sayniska Fasalada 4 iyo 8					
Cilmiga Bulshada Fasalada 4, 8 iyo 10					

Hadafku waa in dhammaan ardayda Wisconsin ay keenaan dhibcaha wanaagsan ama heerka sare ah.

Heerka Shaqada

Heer sare - Ardaygu wuxuu muujinayaa faham aad u xoogan iyo awood uu ku adeegsan karo aqoonta iyo xirfadaha heerkiisa fasalka kuwaas oo ku saabsan u diyaar ahaanshaha waxbarashada koleejka.

Wanaagsan - Ardaygu wuxuu muujinayaa faham ku filan iyo awoodda adeegsiga aqoonta iyo xirfadaha heerka fasalkiisa kuwaas oo la xiriira u diyaargarowga waxbarashada koleejka.


Aasaasi - Ardaygu wuxuu muujinayaa faham aan dhammaystirnayn iyo awood adeegsiga aqoonta iyo xirfadaha heerka fasalkiisa oo aan dhammaystirnayn kuwaas oo la xiriira u diyaargarowga waxbarashada koleejka.

Ka hooseeya Aasaasiga - Ardaygu wuxuu muujinayaa faham kooban iyo awoodda adeegsiga aqoonta iyo xirfadaha heerka fasalkiisa kuwaas oo la xiriira u diyaar garowga waxbarashada tacliinta.

<http://dpi.wi.gov/assessment/forward>

Tacliinta Luuqadda Ingiriisiga

Heerka Shaqada




XXX – Cabirka Dhibcaha

Cabirka dhibcaha ardayga waxaa lagu muujiyaa (↑). Haddii ardaygaan mar labaad xaaladahaan oo kale lagu imtixaamo, dhibcihiisa/dhibcaheedu waxay sii ahaanayaan heerka soo socda:

Nooca Ka warbixinta	Dhibcaha Ardayga	Wadarta Dhibcaha Suurtagalka ah	Heerka Shaqada ee Caadiga ah (SPI)	Heeka SPI
Akhriska				
Fikradaha iyo Tafaasiisha Muhiimka				
Farshaxanka iyo Qaabaynta/ Isku dhafidda				
Adeegsiga Ereyada				
Qoraalka/Luuqadda				
Noocyada Qoraalada iyo				
Cilmibaarista				
Gudbinta Luuqadda				
Dhegaysiga				
Wadarta Dhibcaha Guud ee ELA				

Xisaabta

Heerka Shaqada




XXX – Cabirka Dhibcaha

Cabirka dhibcaha ardayga waxaa lagu muujiyaa (↑). Haddii ardaygaan mar labaad xaaladahaan oo kale lagu imtixaamo, dhibcihiisa/dhibcaheedu waxay sii ahaanayaan heerka soo socda:

Nooca Ka warbixinta	Dhibcaha Ardayga	Wadarta Dhibcaha Suurtagalka ah	Heerka Shaqada ee Caadiga ah (SPI)	Heeka SPI
Xisaab falada iyo Fikradaha Aljabrada				
Tirada iyo Xisaab falada ilaa Tobnaad				
Tirada iyo Xisaab falada - Jajabyada				
Qiyaasaha iyo Xogaha				
Joomatariga				
Wadarta Guud ee Dhibcaha				

Sayniska

Heerka Shaqada




Cabirka dhibcaha ardayga waxaa lagu muujiyaa (↑). Haddii ardaygaan mar labaad xaaladahaan oo kale lagu imtixaamo, dhibcihiisa/dhibcaheedu waxay sii ahaanayaan heerka soo socda:

Nooca Ka warbixinta	Dhibcaha Ardayga	Wadarta Dhibcaha Suurtagalka ah	Heerka Shaqada ee Caadiga ah (SPI)	Heeka SPI
Hababka Sayniska Noolaha iyo Mowduucyada Wax Ikhtiraacidda*				
Hababka Sayniska Muuqaalada iyo Mowduucyada Wax Ikhtiraaca*				
Hababka Sayniska Cirka iyo Dhulka iyo Mowduucyada Wax*				
Hababka Injineeriyadda iyo Mowduucyada Wax Ikhtiraacidda*				
Wadarta Guud ee Dhibcaha				

*Sida lagu qeexay Xeerarka Wisconsin ee 3-geeska ah, Imtixaanka Gudbidda Saynisku wuxuu ardayda weydiinayaa inay adeegsadaan habraacyada sayniska iyo injineeriyada iyo mowduucyada ikhtiraaca ayada oo lagu darayo aqoonta waxbarashada si aqoon looga muujiyo noocyadaan lasoo gudbinayo.

Cilmiga Bulshada

Heerka Shaqada



Cabirka dhibcaha ardayga waxaa lagu muujiyaa (↑). Haddii ardaygaan mar labaad xaaladahaan oo kale lagu imtixaamo, dhibcihiisa/dhibcaheedu waxay sii ahaanayaan heerka soo socda:

Nooca Ka warbixinta	Dhibcaha Ardayga	Wadarta Dhibcaha Suurtagalka ah	Heerka Shaqada ee Caadiga ah (SPI)	Heeka SPI
Cilmiga Habdhaqanka				
Dhaqaalaha				
Juquraafiga				
Taariikhda				
Cilmiga Siyaasadda iyo				
Wadarta Guud ee Dhibcaha				

Imtixaanka Gudbidda ee Wisconsin

Imtixaanka Gudbiddu waa dadaal isku xiran oo ka dhexeeya Waaxda Waxbarashada Bulshada ee Wisconsin (DPI), barayaasha Wisconsin, iyo qandaraaslaheena imtixaanada, Iskaashatada Aqoonsiga Xogaha (DRC) ee degen Midwest. Imtixaanka waxaa loo qaadaa si loo daboolo shuruudaha gobolka iyo federaalka ee warbixinada iyo isla xisaabtanka. Natiijoyinka kasoo baxa Imtixaanka Gudbidda waxaa loo adeegsadaa in lagu diyaariyo Kaararka Warbixinta Dugsiyada ee Wisconsin, laguna dhammaystiro warbixinada federaalka ee waajibka ah. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Imtixaanka Gudbidda ka eeg: <http://dpi.wi.gov/assessment/forward>.

Qiimaynta Qaabilaadda iyo Taageerada

Gobolka iyo federaalkuba waxay u baahan yihiin in qiimaynta gobolku saamaxdo wadajirka ardayda oo dhan, oo ay kujiraan ardayda naafada ah iyo kuwa barta luuqadda Ingiriisiga. Qaabilaadda iyo taageeradu waa habraacyada iyo nidaamyada keenaya adeegsiga waxbarashad heerka fasalka oo ah mid loo siman yahay. Waxaa loogu tala galay in lagu yareeyo saamaynta naafanimada ardayga ama barashada heerka luuqadda; masoo gaabinayaan filashooyinka waxbarashada. Qaabilaadaha ama kaalmooyinka la siiyo ardaydu waa inay waafqasan yihiin waxbarashada fasalka, qiimaynta fasalka, iyo qiimaynta gobolka. Waa muhiim in la ogaado in, ayada oo qaar kamid ah qaabilaadaha ama kaalmooyinku yihiin kuwo sax ah in loo isticmaalo waxbarasho ahaan, haddana aysan sax ahayn in loo isticmaalo qiimaynta heerka caadiga ah. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaabilaadaha iyo kaalmooyinka ka eeg: <http://dpi.wi.gov/assessment/forward/accommodations>.

Xeerarka Tacliinta ee Wisconsin

Xeerka Tacliinta Wisconsin wuxuu qeexayaa waxa laga rabo ardaydu inay bartaan kuna dhex sameeyaan fasalka. Xeerarku waxay u taagan yihiin hadafyada waxbarista iyo waxbarashada, waxayna ardayda, waalidiinta, barayaasha, iyo muwaadiniinta awood u siinaysaa inay ogaadaan waxa ardaydu ku baranaysa wakhti cayiman. Warbixin cad oo ku saabsan waxa laga rabo in ardaydu ogaato ayna awood u yeelato inay samayso waa lagama maarmaan. Arrintaani waxay gacan ka gaysanaysaa hubinta in dugsiyadeenu bixiyaan fursado xooggan, qiimo leh, si fiicana loo diyaariyay kuwaas oo loogu tala galay in ardaydeenu ku helaan aqoon iyo xirfado muhiim u ah u diyaargarowga xirfadaha koleejka. Qiimaynta horumarka xeerarka ku saabsan iyo ujeedooyinka waxbarashada waxaa maalin walba lagu gaaraa habraacyada warbixinada, si marmar ah qiimaynta kumeelgaarka ah, iyo si sannadle ah ayada oo lagu gaarayo cabiro la isku dardaray, oo ay kujiraan Imtixaanka Gudbidda Wisconsin. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xeerarka tacliinta ee Wisconsin, eeg: <http://dpi.wi.gov/standards>.

Adeegsiga Warbixinta Ardayga

Saddex dhibcaha heer maado ah ayaa warbixintaan lagu soo bandhigayaa:

- **Cabbirka Dhibcaha** waa dhibco tiro ah oo loo isticmaalo in lagu cabiro korodhka guulaha ardayga ama koox arday ah ayada oo laga eegayo hal qayb sannadba sannadka ka danbeeya. Cabirro gaar ah ayaa loogu tala galay maado kasta lalamana barbardhigi karo maadooyinka kale.
- **Heerka Boqoleyda** wuxuu barbardhigayaa dhibcaha ardayga kuwa kale ee dadka imtixaanka galay ee isla fasalka iyo isla maadada ah. Tusaale ahaan, heerka boqoleyda ee 75 micnahiisu waa in ardaygu keenay dhibco lamid ah ama ka wanaagsan 75 boqolkiiba marka loo eego dadka qaatay imtixaanka.
- **Heerka Shaqada** waa dhibco gaar ah. Hadafka dhammaanba ardaydu waa inay keenaan dhibcaha heerka wanaagsan ama heerka sare ah.

Saddex heer dhibcood ayaa lagu muujinayaa warbixintaan:

- **Dhibcaha Ardayga** waa tirada dhibcaha ardaygu ka helay fasal kasta iyo guud ahaanba imtixaanka. Wadarta Dhibcaha Suurtagalka ah ayaa sidoo kale lagu muujiyaa.
- **Heerka Shaqada Caadiga ah (SPI)*** waa qiyaasta tirada su'aalaha ardaygu si sax ah uga jawaabi karo haddii ay jiri lahaayeen 100 su'aalood oo ku saabsan maadada lagu imtixamay.
- **Heerka SPI*** waa qiyaasta heerka shaqada ee maado kasta. Noocyada heerka shaqadu waxay kala yihiin heer sare, wanaagsan, aasaasi, iyo aasaasi ka hooseeya.

*NA = Majiraan waxyaabo ku filan oo lagu cabiro waxbarashada maadadaan ee imtixaanka Gudbidda sannadkaan sidii si sax ah loogu xisaabiyo SPI.